# Ogeysiis 30 Maalmood ah oo loogu talagalay Qiimeynta Gobolka Oregon oo ah Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska iyo Xisaabta

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION
*Oregon achieves . . . together!*

## DHIIRIGELINTA SINNAANTA IYO WANAAGA EE WAX BARTE KASTA

Oregon waxaa ka go'aan u diyaarinta wax barte kasta ee aqoonta tacliimeed iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah in guul la gaaro wixii ka dambeeya  dugsiga sare. Qiimeynta Gobolka Oregon oo ah Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska (ELA) iyo Xisaabta waxay si buuxda u waafaqsan yahay Heerarka Gobolka Oregon waxayna ardayda fasallada 3-8 iyo 11, oo ay weheliyaan waalidiintooda siisaa,  hal qiyaas oo ah guusha tacliimeed iyo kobaca.

## IMTIXAANADA GOBOKKA OREGON…

- **…waxaa abuuray barayaasha Oregon** iyo dhowr gobol oo kale
- **…waxay tartan gelisaa ilmahaaga sidii uu si adag ugu fikiri lahaa** oo aqoontiisana u adeegsado xaaladaha kala duwan
- **…waxay dhaafsiisan tahay kala doorashada badan** waxayna ilmahaaga weydiisaa in uu sharraxo jawaabihiisa
- **… waxay noqotaa oo muuqaal guud ka bixisaa horumarka ilmahaaga**  oo ay dhici karto lala tixgeliyo qaybo kale oo macluumaad ah si loo go'aamiyo guusha tacliimeed ee ilmahaaga
- **…waxay dugsiyada iyo degmooyinka ka caawisaa**  qiimeynta nidaamyadooda wax barida iyo waxbarashada, iyo sidoo kale aqoonsiga kooxaha ardayda ah ee baahiyahooda tacliimeed ay dhici karto in aan sidii ku habbooneyd loo buuxin
- **…waxay ka caawisaa** fahamka sida wanaagsan ee dugsiyadooda dadweynuhu ay wax u qabanayaan

**Muddo intee le'eg ayay ku qaadan doontaa ilmahayga in uu ku dhammeystiro imtixaanada gobolka Oregon?**

Ardayda intooda badani waxay imtixaankooda ELA ku dhammeystaan 1.5 ilaa saacadood iyo imtixaankooda Xisaabta oo ah 1 ilaa 1.5 saacadood. Iyada oo sababtu tahay iyada oo aysan jirin wakhti xaddidan oo ay leedahay imtixaanada gobolka Oregon, ilmahaagu wuxuu qaadan karaa ilaa iyo inta uu si buuxda uga muujinayo waxa uu yaqaano ee uu sameyn karo.

**Maxay natiijooyinku ka dhigan yihiin halkeense ka helaa natiijooyinka ilmahayga?**

Natiijooyinka imtixaanka waxaa lagu aqoonsadaa awoodaha ilmahaaga iyo meelaha looga baahan yahay in la wanaajiyo Xirfaddaha Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta. Maado kasta waxaa laga dhigi doonaa qaybo waxayna muujin doontaa sida wanaagsan ee ilmahaagu u qabtay meel kasta. Imtixaanadu waxay qiyaasaan waxbarashada ardayga ee cabbir oggolaanaya isbarbardhiga waqtiga oo dhan. Waaxda Waxbarashada ee Oregon ayaa dejiyay heerarka guul gaarida oo afar ah oo la socda cabbirkani oo guud ahaan sharraxaya waxqabadka tacliimeed ee ardayga. Dugsiga ilmahaaga ayaa dhibcaha ilmahaaga kula wadaagi doona dhammaadka sanad dugsiyeedka hadda lagu jiro ama bilawga ka xiga si loo taageero guusha ilmahaaga marka uu u wareegayo min fasal ilaa fasal kale.

**Waa maxay sababta ka qayb qaadashada ilmahaygu muhiim u tahay?**

Iyada oo aysan jirin hal imtixaan oo sawir buuxa ka bixin karta horumar ilmahaaga, in ilmahaaga qaato imtixaanka  gobolka oo dhan waxay barayaasha iyo maamulayaasha siisaa hal ilood oo ah macluumaad ku saabsan hababka waxbarasho ee shaqeynaya iyo halka ay dhici karto in looga baahdo ilo dheeraad ah. Ka qayb qaadashada ilmahaagu waxay muhiim u tahay xaqiijinta in dugsiga iyo degmadu ay helaan ilaha diirada la saarayo si looga caawiyo in ardayda oo dhan guulaystaan.

**Goorma ayuu ilmahaygu qaadan doonaa imtixaanka?**

Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee ilmahaagu qaadan doono imtixaanada taasi oo ah waqtiga la qaadayo imtixaanada gobolka oo dhan. Waqtiga la qaadayo imtixaanka gobolka oo dhan ee Xirfaddaha Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta wuxuu khuseeyaa imtixaan wadareedka guud iyo ta beddelka ah ee gobolka oo dhan.

| Fasallada 3-8 | Fasallada 11 |
|---|---|
| 04/01/2025 — 06/13/2025 | 02/04/2025 — 06/13/2025 |

## LA SOCO WARKA

Booqo bogga internet-ka ee Starting Smarter ee Oregon (https://or.startingsmarter.org) si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato waxa ay tahay in ilmahaagu ka warqabo una awoodo in uu sameeyo Xirfaddaha Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta, si loo eego tusaalaha su'aalaha qiimeynta iyo si loo akhriyo waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan natiijooyinka imtixaanka ee ilmahaaga.  Kala xiriir macallinka ardaygaaga ama maamulaha dugsiga wixii su'aalo ah.

# Foomka In aanan Laga qayb qaadan OSAS ee Sanadlaha ah (2024-25)

## SHARAXAADA XUQUUQDA

Sharciga  Oregon ee (ORS 329.479) ayaa waalidiinta/mas'uuliyiinta iyo ardayda waaweyn u oggolaanaya* in ay si sanadle ah aysan uga qayb qaadan imtixaanada gobolka Oregon ee *Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska (ELA) iyo/ama Xisaabta* iyaga oo foomkani u gudbinaya dugsiga uu ardaygu dhigto. Dugsigu waa in arday kasta oo laga cafiyay qiimeynta gobolka oo dhan ee ELA ama xisaabta siiyaa waqti wax barasho oo kor lagala socdo inta ardayda kale ay gelayaan imtixaanka.

**Si aan looga qayb qaadan imtixaanada gobolka oo dhan ee OSAS ee Xirfaddaha Luqadda Ingiriisiga (ELA) iyo/ama Xisaabta, qaybtan waa in uu buuxiyaa waalidka/mas'uulka ama arday weyn:**

Magaca Dambe ee Sharciga ah ee Ardayga: ______________________________________________________

Magaca Hore ee Sharciga ah ee Ardayga: ________________________________________________________

Fasalka Ardaygu Isqoray: ____________________

Dugsiga Ardayga: ___________________________________________________________________________

PPS ID (Agoonsiga): _______________________

**Fadlan tilmaan imtixaanada gobolka oo dhan ee OSAS ee aadan ka qayb qaadanayn:**

☐ Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska

☐ Xisaabta

Si looga caawiyo in dugsiga ilmahaaga in uu si hufan u qiimeeyo maamulka imtixaanada, **fadlan foomkan u gudbi dugsiga ilmahaaga ugu yaraan toddobaad ka hor maalinta u horreysa ee qaadashada imtixaanka**. Ardayda isqorta ka dib marka waqtiga loogu talagalay in imtixaanada gobolku bilaabmaan, waxaa lagugu dhiirigelinayaa in aad foomka ku soo gudbiso muddo 2 toddobaad gudahood ee isqorida. **Foomkan waa mid kaliya sax ah/shaqeynaya oo loogu talagalay sanad dugsiyeedka hadda lagu jiro**.

**Waan fahamsanahay in saxiixida aan saxiixayo foomkan in aan iska dhaafayo oo ilmahaygu ka maqnaanayo imtixaanada qiimeynta gobolka oo dhan ee OSAS ee kor lagu tilmaamay ee loogu talagalay sanad dugsiyeedka hadda jira oo kaliya.**

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka**: _____________________________________ Taariikhda: _____________

Magac Daabacan ee Waalidka/Mas'uulka**: ___________________________________________________

Foomkan waxaa la gudbin karaa waqti kasta ka hor xiritaanka waqtiga la qaadayo imtixaanka. Haddii ardayga hore looga qaaday imtixaanka, imtixaanka waa la burin doonaa; xogtiisa imtixaanka waxaa laga saari doonaa nidaamka xogta ee gobolka; waxaana loo xisaabin doonaa in uu yahay qof aan ka qayb qaadan imtixaanka sanadkani. Codsiyada la soo gudbiyay ka dib maalinta u dambeysa ee waqtiga la qaadayo imtixaanka lama maamuusi karo.

*Ardayda waaweyn ee (da'doodu tahay 18 iyo ka weyn tahay) waxay saxiixi karaan iyaga oo iska wakiil ah umana baahna saxiixa waalid ama mas'uul.

**Ku qorida magacaaga ee sanduuqa saxiixu ee ah qaab dijitalka wuxuu tilmaamayaa saxiixaaga rasmiga ah.